

## Kulleejada xagaabaxa carruurta ee 2018

### Waa maxay kulleejada xagaabaxa carruurta?

Kulleejada xagaabaxa carruurta waxaad ka heleysaa saaxiibbo aad la dabaalato, la joogto, kubbad la dheesho, u raacdo duur ku lugeyn, kalluundabasho, doonni-raac, la cayaarto iyo waxyaalo kale. Sideedaba maalmo xilli-kulayl oo hawo macaan oo xeebta la isla joogo, la islana sameeyo waxyaalo badan oo lagu madadaasho.

Kulleejada waxaad joogeysaa 6 ama 7 ama 8 maalmood, taas oo hadba ku xiran fasalka aad dhigato. Waxaa kulleejada wax ka qabanqaabinnaa xilliyo badan ee xilliga kulaylaha.

Xilliga koowaad	2018-06-16 – 2018-06-21	<b>Fasalka 6 maalmood</b> 4-5
Xilliga labaad	2018-06-25 – 2018-07-01	<b>Fasalka 7 maalmood</b> 5-6
Xilliga saddexaad	2018-07-04 – 2018-07-11	<b>Fasalka 8 maalmood</b> 6-7
Xilliga afraad	2018-07-14 – 2018-07-20	<b>Fasalka 7 maalmood</b> 7-9

Kulleejada KFUM Rengen waxay ku taal bannaanka Sturefors oo qiyaastii 20 km u jirta Linköping. Waxaan xilli walba diyaarinnaa bas weyn oo aan wada raacno. Dhawr hoggaamiye ayaa baska raaca, kuwa kalena waxay ku haraan kulleejada oo idin qaabbilaan marka aad halkaas tagtaan. Bas ayaad raaceysaan oo ku noqoneysaan Linköping marka xilliga aad kulleejada joogtaan uu dhammaado.

Waxaan degeynnaa guryo yaryar. Waxaana jira guri weyn oo cuntada lagu cuno dhaqdhaqaaqyaduna ka socdaan. Waxaad halkaas la joogeysaa carruur kale oo isla deggan guryahaas oo midkiiba ay yaalliin 6 ilaa 8 sariirood. Hoggaamiyayaashu waxay deggan yihiin qolalkooda oo guriga ku dhexyaal. Mar walba waxaa halkaas jooga hoggaamiye aad la hadli karto, xataa habeenkii, haddii ay matalan kugu adkaato inaad seexato ama aad u baahato qof aad la hadasho.

Qof weyn oo guriga kula jooga u sheeg inaad xiiseyneyso kulleejadaas ama aad dooneyso inaad wax ka ogaato ka hor inta aadan codsan.

### Kulleejada xagaabaxa carruurta

Waxaa soo qabanqaabinna annaga oo ka soconna Fritidsverksamheten oo qayb ka ah Qaybta maamulka degmada Linköping u qaabbilsan kaalmaynta iyo maalgelinta. Waxaana hawlahaan kulleejooyinka xagaabaxa noo xilsaaray Guddiga arrimaha carruurta iyo dhallinyarada. In carruurta iyo dhallinyarada la siiyo joogitaan ammaan ah oo deggan ka sokow waxaa kaloo kulleejooyinkaas laga helaa wadajoogid, xasuus lama illaawaan ah iyo in qof ahaan wax laga faa'iido. In maalmahaas reerka laga maqan yahay waxay noqon kartaa tallaabo weyn.

Inta halkaas la joogo waxaa ka shaqeeya 1 ilaa 2 horjooge kuxigeenno ah iyo tiro hoggaamiyayaal ah. Mas'uuliyadda ugu weyn ee hawlaha meeshaasi waxay saaran tahay horjoogaha iyo madaxa hawlaha waxqabadka.

### Tegidda iyo ka soo noqoshada kulleejada

Bas wadajir loo raaco oo ka baxa Linköping ayaa kulleejada loo raaca, loogana soo noqdaa.



**Linköping**  
Där idéer blir verklighet



**UNGDOMSARENOR  
I LINKÖPING**



## Boos-xaqiijin

Haddii boos la idinka siiyo kulleejada xagaabaxa, waxaad ugu dambeyntii 2018-05-04 naga heleysaan warqad xaqiijin ah. Markaasna waxaad haysataan hal toddobaad oo aad soo gudbineysaan jawaab haa ama maya ah.

FIIRO GAAR AH! Lagama noqon karo codsiga la soo gudbiyo.

<b>Kharash</b>	<b>Xilliga koowaad</b>	<b>Xilliga labaad</b>	<b>Xilliga saddexaad</b>	<b>Xilliga afraad</b>
	<b>6 maalmood</b>	<b>7 maalmood</b>	<b>8 maalmood</b>	<b>7 maalmood</b>
Ilmaha koowaad	400 kr	500 kr	600 kr	500 kr
Ilmaha labaad	300 kr	350 kr	400 kr	350 kr
Ilmaha saddexaad iyo afraad	200 kr	250 kr	300 kr	250 kr

## Waxaa codsiga (boggaga 3-4) loo dirayaa:

Linköpings kommun

Sektionen för resurs- och stödverksamhet, Koloniverksamheten

Klostergatan 24

581 81 Linköping

## Maalinta codsiga ugu dambaysa: 2018-04-06

Meel ku xafido bogga koowaad iyo kan labaad oo arjiga codsiga la socda, waayo waxay kuu fududeynayaan inaad nala soo xiriirto. Waxaan kugu soo dhoweyneynaa inaad nala soo xiriirto haddaad su'aalo qabto.

Therése Hansson

013-20 71 88

[therese.a.hansson@linkoping.se](mailto:therese.a.hansson@linkoping.se)

## Warbixinta maareynta warbixinaha dadka (Sharciga warbixinaha qofka SFS 1988-204)

Warbixinaha ku qoran codsiga waxaa maareynaya Qaybta hawlaha kaalmeynta iyo maalgelinta oo u isticmaaleysa xagga maamulka iyo arrimo kale oo loogu baahan yahay wax-ka-qabadka arrinta. Waxaa kaloo dhici karta in warbixinahaas loo isticmaalo tirakoob iyo bixinta kharashka. Waxaad xaq u leedahay inaad sannadkiiba hal mar soo gudbiso qoraal aad saxiixday oo aad ku codsaneyso in warbixin lagaa siiyo habka loo isticmaalay warbixinahaas.

Qaybta hawlaha kaalmeynta iyo maalgelinta waxaa waajib ku ah inay saxaan warbixinaha qaldan ama been ah.



**Linköping**  
Där idéer blir verklighet



**UNGDOMSARENOR  
I LINKÖPING**



**Carruur/dhallinyaro**

Magaca (ilmihiiiba hal codsi)	Lambarka aqoonsiga (tobanka lambar)
-------------------------------	-------------------------------------

**Mas'uulka ilmaha**

Magaca mas'uulka koowaad ee ilmaha	Lambarka aqoonsiga (tobanka lambar)
Adareeska waddada	Lambarka boosta iyo degmada
Telefoonka guriga	Telefoonka gacanta
E-mail	

Magaca mas'uulka labaad ee ilmaha	Lambarka aqoonsiga (tobanka lambar)
Adareeska waddada	Lambarka boosta iyo degmada
Telefoonka guriga	Telefoonka gacanta
E-mail	

**Dugsi:**

Magaca dugsiga	Fasalka	Baraha fasalka
----------------	---------	----------------

**Warbixino la isweydaarsado dugsuga ilmaha**

Hawlaha arday loo oggolaanayo kulleejooyinka xagaabaxa waxaa ka mid noqon kara inaad mararka qaarkood u baahanno inaan la xiriirno dugsiga ilmaha si aan wax dheeraad ah uga ogaanno waxyaalaha ilmuhu ku liito ama ku fiican yahay iyo baahidiisa. Taasi waxay la micne tahay in:  
 "Warbixinaha qarsoodiga ah ee hawlaha kulleejada xagaabaxa loogu baahnaan karo in dugsiga loo gudbiyo ama warbixinaha qarsoodiga ah ee dugsiga loogu baahnaan karo in loo gudbiyo kulleejada xagaabaxa. Waxaan oggolahay/oggolnahay kulleejada xagaabaxa iyo dugsiga ilmuhu ay is dhaafsan karaan warbixinaha qarsoodiga ah.

Haa       Maya       Waxaan doonayaa inaan wax dheeraad ah ogaado



**Waa muhiim inaan ogaanno**

Xasaasiyad-cudur-daawo	
<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Haddii ay Haa tahay, maxaad xasaasi ku tahay? Cudurkee? Daawadee?	
Cunto gaar ah	
<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Haddii ay Haa tahay, cunto nooc ee ah?	
Waa dabaalan karaa	mitir

**Warbixin intaas dheer**


**Maxaad u codsatay kulleejada?**


**Sheeg lambarka doorashada xilliga kulleejada 1=doorashada 1aad iyo 2=dooraashada 2aad**

Xilliga koowaad Fasalada 4-5	<input type="checkbox"/>	Xilliga labaad Fasalada 5-6	<input type="checkbox"/>
Xilliga saddexaad Fasalada 6-7	<input type="checkbox"/>	Xilliga afraad Fasalada 7-9	<input type="checkbox"/>

Ilmuhu horay ma u soo joogey kulleejo xagaabax?	
<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Haddii ay Haa tahay, sannadkee/sannadahee?	
Codsii ma loo gudbiyey walaalaha ilmaha?	
<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Haddii ay Haa tahay, sheeg magaca iyo sannadka dhalashada walaalka	

**Saxiixa waalidka/mas'uulka**

Degmada iyo taariikhda	
Saxiixa waalidka 1aad	Magaca oo saddexan
Degmada iyo taariikhda	
Saxiixa waalidka 2aad	Magaca oo saddexan

**Qofka kharashka lagu soo hagaajinayo**

FIIRO GAAR AH Codsiga lagama noqon karo oo kharashka waa la bixinayaa xataa haddaan booska la isticmaalin. Haddii la xanuunsado waa in la keenaa warqad dhakhtar

Magaca	Lambarka aqoonsiga (tobanka lambar)
Adareeska waddada	Lambarka boosta iyo degmada
Saxiix	Magaca oo saddexan

Maalinta codsiga ugu dambeysa: 2018-04-06



UNGDOMSARENOR  
I LINKÖPING



**Waxaa codsiga lagu hagaajinayaa:**

Linköpings kommun, Sektionen för resurs- och stödverksamhet  
Koloniverksamheten  
Klostergatan 24  
581 81 Linköping